



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS

Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 8 ^{aad}	Kulanka: 3 ^{aad}
Taariikhda: 05/09/2026	Goobta fadhiga: Golaha Aqalka Sare
Saacadda uu furmay: 11:07 AM	Saacadda uu xirmay: 11:51 AM
Shir guddoonka fadhiga: Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare	Guntanka Kulanka: 29 Senator
Martida Kulanka: Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Cadaalada iyo Dastuurka Mudane Axmed Cabdiraxmaan	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Akhrinta 2aad ee Hindise Sharciyeedka Dib-u- eegista Sharciga La-dagaalanka Burcad-badeedka iyo Ka hortagga Afdubka.

Furitaanka Kulanka:

Senator Saciid Cabdi Xuseen ayaa akhriyey Aayadaha Qur'aanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 27 Senator

Aamusnaansho: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Guddiga Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Awqaafta, Xuquuqul insaanka, si ay Golaha uga hor jeediyaan warbixinta Akhrinta 2aad ee Hindise Sharciyeedka Dib-u-eegista Sharciga La-dagaalanka Burcad-badeedka iyo Ka hortagga Afduubka, Senator Saciid Cabdi Xuseen ayaa Golaha ka hor akhriyey warbixinta, isaga oo faahfaahin ka bixiyey qodobbada uu Guddigu wax ka beddelay iyo kuwa uu sixitaanka ku sameeyey. Warbixinta kadib, 7 Senator ayaa ka dooday akhrinta labaad ee Hindise-sharciyeedka.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa faray Guddiga Garsoorka inay soo diyaariyaan qodobada laga dooday, iyaga oo la kaashanaya sharciyaqaanada Golaha Aqalka Sare, si loo marsiiyo akhrinta saddexaad.

Ugu dambayntii Guddoomiyaha Golaha Senator Cabdi Xaashi Cabdulaahi ayaa kulanka soo xiray saacadu markay ahayd 11:51 AM

=DHAMMAAD=